

## **Xaashida Xaqiiqada Ilaalinta: Mutaddaawiciinta Bulshada inta lagu jiro faafidda fayruska korona (COVID-19)**

Waxaa laga yaabaa in dadka ay rabaan inay caawiyaan dadka kale ee hadda xanuunsan ama ku jiro halis gaar ah inuu ku dhaco cudurka fayruska korona. Kani waxaa ka mid ah dadka duqa ah iyo kuwa leh xaalad caafimaad gaar ah oo ku jiro waalida/dhimir-beelida. Si loo joojiyo faafka fayruska, dowladda waxay soo bandhigtay taloyin oo ka mid ah daboolidda wajiga, iyo sida aan dadka kale xiriir la yeelanno markaan joogno meel dibedda ah ama gudaha ah ayadoo la raacaayo shuruudda lixda qofood, iyo sidoo kaleba sida dadka kale lo siiyo daryeel.

Qaar ka mid ah dadka wayn ee nugulka ah, sida kuwa qaba cudurka waalida ama baahi caafimaad kale, waxaa la caawin karaa ayadoo loo maraayo mutaddaawiciinta bulshada. Xaashidaan xaqiiqada ah wuxuu ka hadli doonaa walaacyo gaar ah ay qabaan dadka taageero bulshadooda, si loo hubiyo in dadka baahida qaba ay ku joogaan si ammaan ah.

**Waxaan rabaa inaan qaban-qaabiyo koox bulshadeed oo si mutaddaawac ah ku bixin karaan cunto iyo soo u qaadi karo daawoyin dadka aan awoodin inay ka baxaan gurigooda. Miyaan u baahanahay inaan mutaddaawiciinta ku sameeyo baaritaanka Adeegga Shaacinta iyo Joojinta (Disclosure and Barring Service (DBS))?**

DBS waa hab lagu baaro haddii qof horey dembi u galey, kaasoo ka dhigaayo qof aan ku habbonayn inuu la shaqeeyo dadka nugulka ah.

Maya, ma jiro shuruud sharchiyeed inaad mutaddaawicinta ku sameyso baaritaanka DBS. Qaar ka mid ah ururyada (sida ururyada samafalka qaranka) waxaa laga yabaa inay isticmaalaan siyaasaddaan iyo DBS wuxuu sida ugu dhaqsi badan u qabtaa baaritaanyadaan.

Waxyaabaha la rabo inay tixgeliyaan ururyada deegaanka ee qorsheynayo inay bulshada deegaankoda ka qaban-qaabiyaan taageerida mutaddaawiciinta dadweynaha:

- Waxa ugu muhiimsan aad samayn kartid mutaddaawac ahaan waa in kooxdaada tixgeliyo wax-qabadyada ilaalinta. Sameynta taxaaddaro fudud sida diiwaangelinta lacagta la isticmaaley iyo keydinta resiidyada alaabta la soo iibiyay ayaa ku caawin doono markii aad taageerayso dadka nugulka ah.
- Haddii qof kale la shaqeynayso, waa in waqtii walba masaafu laba mitir ah idinka dhexeeyo.
- Waa inaad waxyaabaha lagama marmaanka ah sida cuntada iyo daawoyinka soo iibsato marar dhif ah haddii uu suurtogal yahay. Alaabta dhig albabka guriga dibeddiisa, markuu suurtogal yahay, si aad uga hortagto inaad gasho guri kale.

Macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan hab-socodyada ilaalinta iyo baaritaanyada DBS waxaa laga heli kaaa bogga dowladda ee ku qoran su'aalaha badanaa la is-weydiyo.

**Waxaan jecelahay inaan mutaddaawac noqdo si aan u caawiyo dadka waddadeyda degan oo aan awoodin inay ka baxaan gurigooda, waxaan u keeni karaa waxyaabaha dukaamada laga iibiyo ama waxaan u soo socodsiin karaa eygooda. Miyan u baahanahay baaritaanka DBS?**

Maya, ma jiro shuruud sharchiyeed sheegaayo inaad u baahan tahay baaritaanka DBS.

Laakiin mutaddaawiciinta waxay rabi doonaan inay si cad u ogaadaan waxay sameynayaan iyo in laga aaminsan yahay bulshada ay caawiyaan. Tallaaboyin ka hortag fudud sida isla shaqeeynta laba qofood, meel ku qoridda lacagta la isticmaaley iyo keydinta resiidyada ayaa kani lagu qancin karaa.

Haddii aysan ka socon isla guriga, mutaddaawiciinta waa inay mar walba masaafu laba mitir siiyan dadka kale.

Fadlan xasuuso in mamnuuc yahay in lix qofood ka badan iskula yimaadaan meel, iyo in shuruudahaan uu booliska fulin doono. Laakiin kooxaha taageerida ka kooban ilaa 15 qofood, ay ku jiraan kuwa baxsho taageerida dadka qaba jirro daba-dheeraad ah sida cudurka waalida ayaa laga reebay shuruudahaan oo waa loo ogol yahay inay isla kulmaan.

### **Miyaa dad laga mamnuucey mutaddaawacnimada?**

Dadka kaliya ee sharci ahaan loo oggolayn inay mutaddaawac u noqdaan dadka wayn ee nugulka ah waa kuwa uu DBS ka mamnuucay inay sidaasi sameyaan. Haddii lagaa mamnuucay hawlo gaar ah, markaa dembi ayaad geleysaa haddii aad isku daydo inaad sameyso shaqadaas.

Kooxoyinka Bulshada waa inay mutaddaawiciintooda weydiyaan haddii laga mamnuucay hawsha. Haddii laga mamnuucay, markaa waa inaadan u oggolaanin inay si soke la shaqeyaan carruurta ama dadka wayn ee nugulka ah. Macluumaad ka badan ka eeg hagahaan DBS.

---

Macluumaadkaan wuxuu ku salaysan yahay talada dowladda <https://www.gov.uk/government/publications/safeguarding-factsheet-community-volunteers-during-covid-19-outbreak>

Talada fayruska korona ee Dowladda waxaa la cusbooneysiiyay 22 Sebtembar <https://www.gov.uk/government/news/coronavirus-covid-19-what-has-changed-22-september>